



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Luulyo 15, 2021

Ku socota: Daneenayaasha ODDS (CME iyo Daryeel Bixiyayaasha: Fadlan farriintan la wadaag dadka ka tirsan adeegyadani)

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Caawimaada haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah

Farriintani waa mid lagu xaqiijinayo in dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD), xubnaha ka tirsan qoyska, adeeg bixiyayaasha iyo hay'adaha maamulka kiiska ay ka warqabaan ilaha la heli karo haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah.

Oregon waxay leedahay xilliga dabka kaynta oo adag, iyo sidoo kale waqtiyo ay jiraan kuleyl aan horay loo arag. Hay'adaha Maamulka Kiisku (CME) waa in ay raacaan qorshayaashooda xaalada degdega ah ee la xiriira kuleylka iyo korontada la'aanta imaan karta oo sii wadaa in ay dadka iyo qoysaska ka caawiso dhammeystirka iyo wax ka beddelka qorshayaashooda xaalada degdega ah sida loogu baahdo. CME waa in ay sidoo xiriir la sameeyaan xarumaha [hawlgalada xaalada degdega ah ee degaanka](#) haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah. Daryeel bixiyayaashu waa in ay raacaan qorshayaashooda xaalada degdega ah oo xaqiijiyaan in qof kasta oo ka tirsan adeegyadu ka warqabo qorshayaasha.

ODDS ayaa dhawaan sameysay farriin ku saabsan [kulaylka xad dhaafka ah](#), oo ay ku jiraan ilo iyo liiska xarumaha xaalada degdega ah ee degaanka. Haddii aad ku nooshahay degaan u dhow meel dab firfircoon ka jiro, ama qabto walwal ku saabsan qiiq iyo walwal dhanka badbaadada ah, fadlan isla markiiba la xiriir maamulahaaga kiiska (Iskuduwaha Adeegyada ama Wakiilka Shakhsiyeed) si aad ugala hadasho qorshaha ammaanka iyo ilaha la heli karo ee la sii marayo adeegyada naafanimada koriinka.

Fadlan ogow in caafimaadka iyo badbaadada dadka qaba I/DD ay mudnaanta koowaad noo leeyihiin. Fadlan ha ka gaabsan in aad la xiriirto maamulahaaga kiiska ama daryeel bixiyahahaaga haddii aad qabto walwal. Xaqiiji in aad leedahay qorshe jira oo loogu talagalay xaalada degdega ah isla markaana aad qorshahaasi kala hadasho dadka aad isku dhow dihiin iyo dadka ka tirsan kooxdaada taageerada.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.